

Barium Swallow


A barium swallow is an x-ray that checks for problems in your throat, esophagus, stomach and small intestine. You drink a white chalky liquid called barium to get pictures on x-rays.

If you are breastfeeding, pregnant, or think you might be, tell the staff before the x-ray is taken.

Arrive on time for you test. The test takes about 15-45 minutes. You may need to stay for up to 6 hours for more x-rays if your small intestine is being looked at.

To Prepare

- Do not eat or drink anything, including water, after midnight before the test.
- Do not smoke after midnight before the test.
- If you need to take your medicines the morning of the test, take them with sips of water only.



Liqidda Barium


Liqidda barium waa raajo lagu hubinayo dhibaatooyinka ka jira hungurigaaga, jidiinka, caloosha iyo xiidmaha yar-yar. Waxaad cabbaysaa cabitaan jeeso u eg oo loo yaqaanno barium si sawirro looga helo raajada.

Haddii aad tahay qof naas nuujiya, uur leh, ama laga yaabo in aad yeelato, shaqaalaha u sheeg ka hor inta aan raajada lagu saarin.

Baaritaanka waqtiga ugu imow. Baaritaanku wuxuu qaadanayaa ilaa 15-45 daqiiqadood. Waxaa laga yaabaa in aad u baahato in aad joogto ilaa 6 saacadood si raajooyin kale lagaaga qaado haddii xiidmahaaga yar-yar la eegayo.

Si aad isugu Diyaariso

- Waxna ha soo cunin waxna ha soo cabbin, marka lagu daro biyo, wixii ka danbeeya saqda dhexe habeenka baaritaanka ka horreeya.
- Sigaar ha soo cabbin wixii ka danbeeya saqda dhexe habeenka baaritaanka ka horreeya.
- Haddii aad u baahan tahay in aad qaadato daawooyinkaaga subaxda baaritaanka, ku qaado kabbashooyin biyo ah oo keliya.



During the Test

- You will wear a hospital gown.
- You are given 1 or 2 barium drinks. The drink tastes chalky and may be flavored.
- X-rays are taken as the barium flows down your esophagus into your stomach. You may need to stand or lie on a table for the x-rays. The table is moved in many positions. As you move, the barium coats the inside of your stomach and intestines. More x-rays are taken as the barium moves through your body.
- If you are to have x-rays of your small intestine, it may take up to 6 hours to complete your test.

After the Test

- Your stool will be light colored for 2-3 days after the test.
- Drink 6-8 glasses of liquids after the test. This will help remove the barium from your body and keep you from being constipated.
- Test results are sent to your doctor. Your doctor will share the results with you.

Wagtiga Baaritaanka

- Waxaad xidhan doontaa goonnada isbitaalka.
- Waxaa lagu siinayaa 1 ama 2 cabitaan oo barium ah. Cabitaanku wuxuu u dhadhamayaa sidii jeeso (tamaashiir) oo kale waxaana laga yaabaa in wax lagu daro dhadhan u sameeya.
- Raajooyin ayaa lagu saarayaa inta ay barium-tu hunguriga hoos caloosha ugu sii raacayso. Waxaa laga yaabaa in aad u baahato in aad ku istaagto ama ku seexato miis si raajada lagu saaro. Miiska waxaa loo dhaqaajinayaa boosas badan. Marka aad dhaqaaqdaba, barium-tu waxay dabooleysaa gudaha calooshaada iyo xiidmaha. Raajooyin kale ayaa lagu saarayaa inta barium-tu ay jidhkaaga ku dhex soconeyso.
- Haddii raajo laga saarayo xiidmaha yar-yar, waxaa laga yaabaa in ay qaadato ilaa iyo 6 saacadood si baaritaanka loo dhammeystiro.

Baaritaanka ka Dib

- Saxaradaadu waxay noqon doontaa mid midab khafiif ah leh ilaa 2-3 maalmood baaritaanka ka dib.
- Cab 6-8 koob oo cabitaanno ah baaritaanka ka dib. Tani waxay kaa caawin doontaa in aad jidhkaaga barium-ta ka soo saarto waxayna kaa ilaalineysaa in saxaradu kugu adkaato.
- Natiijooyinka baaritaanka waxaa loo soo dirayaa takhtarkaaga. Takhtarkaaga ayaa kula socodsiin doona natiijooyinka.

Call your doctor if you have:

- Barium in your stool 3 days after the test
- A thin stool or notice a change in your bowel habits
- Stool that is not normal in 3 days
- Pain in your lower abdomen or stomach

Call your doctor **right away** if you:

- Cannot stop vomiting
- See blood when you vomit or have blood in your stool

Talk to your doctor or nurse if you have any questions or concerns.

Takhtarkaaga wac haddii aad isku aragto:

- Barium saxaradaada la socota 3 maalmood oo baaritaanka ka danbeysa
- Saxaro khafiif ah ama aad ogaato isbeddel ku dhacay caadigii musqul gelidda
- Saxaro aan caadi ahayn 3 maalmood
- Xanuun qaybta hoose ee uur ku jirta ama caloosha kaa qabta

Isla markiiba wac takhtarkaaga haddii:

- Aadan joojin karin matagid
- Aad isku aragto dhiig marka aad matagayso ama dhiig saxarada la socda

La hadal dhakhtarkaaga ama kalkaalisada haddii aad wax su'aalo ama walaac ah qabtid.